



SOMALI

RINGERIKE
KOMMUNE

XANAANADA – bilow wanaagsan!



Xanaanada carruurta, cunugaada wuxuu bartaa luqada norweejiga, wuxuu bartaa carruurta kale wuxuuna si fiican ugu diyaar garoobaa bilaabida iskuulka.

Xanaanadu waa meel ammaan u ah ilmahaaga.

U codso booska xanaanada ilmahaaga oo siiso
bilow wanaagsan!



Xanaanadu waxay muhiim u tahay ilmahaaga iyo adigaba

Xanaanadu waa goob ladnaanta, saxiibtinimada iyo horumarka. Cunugaaga wuxuu wax ku bartaa ciyaarta iyo waxqabadyada kale.

Xanaanadu waxay qayb ka tahay waxbarashada. Xanaanada carruurta, cunuggu wuxuu ku bartaa luqada norweijiga wuxuuna bartaa dhaqanka norwiiijiga. Carruurta bartay luqada noorwiiijiga ka hor intaysan bilaabin iskuulka waxay ku ficnaadaan iskuulka.

Carruurta waxay baran karaan dhowr luqadood, isla mar ahaantaana waa inaad ku taageertaa ilmahaaga horumarka afkooda hooyo.

Xanaanada, waalidiintu waxay fursad u helaan inay la kulmaan waalidiin kale ee carruur yar yar leh.

Waa amaan goobta xannaanada carruurta

Xannaanadu, carruurta si fiican ayeey u daryeelaan, waxa joogo daryeela oo aqoon leh, shaqaalaha iyo waalidiinta ayaa isku raacayo waxa ku haboon ilmaahaga.

Xannaanada carruurta waxay raaxdaa axdiga qaramada midoobay ee xuquuqda carruurta: Dadka waaweyn waa inay sameeyaan waxa ugu fiican carruurta.



Sideen ku ogaan karaa xalada ilmahaygu ee xanaanada?

Waxaad xiriir dhowr la leedahay shaqaalaha xanaanada, waxaadna helayso fursad aad shaqaalaha uga hadasho ilmahaaga.

Xanaanada carruurta waxay yeeshaan saaxiibo waxayna ka qayb galaan ciyaar iyo nashaadaad xiiso leh.

Waa maxay qiimaha xanaanada carruurta?

Qiimaha booska xanaanada waxaad ka heli kartaa bogga degmada Ringerike: www.ringerike.kommune.no/barnehager

Waxaad xaq u yeelan kartaa inaad bixiso qiimo hoose ama 20 saacadood oo bilash ah usbuuci haddii:

- dhaqaalahaga aad u hooseyo.
- ama aad leedahay dhowr carruur oo xannaanada ku aado

War bixin dheeri ah waxaad ka heli kartaa haddii aad la xiriiro xarunta dawladda hoose.

Taleefan: **32 11 74 00**

iimayl: servicetorget@ringerike.kommune.no

SIDEEN U CODSADAA BOOS XANAANO?

Waxad boos ka codsan kartaa, bogga xanaanada carruurta ee websaydhka degmada: www.ringerike.kommune.no/barnehager



RINGERIKE
KOMMUNE

Waxaan kaa caawinayna inaad codsato xannaanada!

Kalkaaliye caafimaad oo jooga rugta caafimaadka degmada aad ku nooshahay ama xafiiska qoysaska ayaa kaa caawin kara buuxinta codsiga xannaanada.



Akhriso, warbixin dheeraad ah oo ku sabsan sababta aay muhiim u tahay xannaanada:

www.ringerike.kommune.no/multilingual

Ilmaahaga geey xannaanada!

ringerike.kommune.no